


UNUGGA XIRIIRKA KOMUYUUNATIGA

QEYBTA BOOLISKA ee COLUMBUS • XAFIISKA JAWAABAHA
ISTARAATEJIGA AH



Tallaabboyinka Dacwad-oogidda Dembi Yar

Dacwooyinka dembiyada yaryar waxa laga yaabaa inuu boolisku xareeyo, ama uu boolisku u diro Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada (Waaxda Kiis-qabashada) si loo xareeyo dacwad dembi. Dembiga yari waa dembi xukunkiisa ugu badan uu yahay 6 bilood iyo/ama ganaax dhan \$1,000 doolar.

Dembiyada yaryar waxa dacwad ku soo oogga:

Xafiiska Qareenka Magaalada Columbus Qeybta Dacwad-ooggaha
375 S. High St., 7th Floor
Columbus, Ohio 43215
Telefoonka (614) 645-7483

Fadlan waxaad wacdaa Xafiiska Dacwad-ooggaha Magaalada si aad u oggaato saacadaha ay shaqeyso Waaxda Kiis-qabashada.

Marka eedeeysanaha la qabto, ama looga yeero maxkamadda, waxa bilaabma baroosaska maxkamadda sida soo socota:

1. Maxkamad saarid

- Eedeeysanaha ayaa bareeriiisa dhiibta (oo inta badan ah 'Ma Sameyn Dembi' xilligan).
- Inta badan waa in dhibbanayaashu ay maxkamadda joogaan si ay u codsadaan amar illaalin ah. Amarka illaalinta waxa guud ahaan loo heli karaa shaqaaqada guriga iyo xaaladaha dabagalka ah (stalking situations). Haddii dhibbane aanu rabin amar illaolineed, qasab kuma aha inuu hor yimaaddo maxkamad saaridda.
- Xaakinka ayaa sheega caddadka lacagta furashada. Waxa laga yaabaa in eedeeysanuhu uu awoodo ama aanu awoodin inuu jeelka ka baxo.
- Wuxaad heli doontaa U-doode Sharci ah oo adiga ku caawin kara.

FIIRO GAARA: La xiriir xafiiska VINE wixii macluumaad ku saabsan heerka xiritaanka eedeeysanaha.

2. Shirka ka hor xukun saarka

- Kiiska waxa lagu qoraa xaakin joogta ah.
- Dhibbanayaasha waxa laga codsan doonaa inay maxkamadda hor yimaaddaan, laakiin waxa laga yaabaa in xaaladaha qaarkood uu dacwad-ooguhu dhibbanaha saaro telefoonka.

- Dacwad-ooggaha iyo qareenka difaaca ayaa is-dhaafsada macluumaad iyo caddeymo.
- Eedeeysanaha ayaa qirta inuu galay eedeeeyntii orijinaalka ahayd ama wuxuu qirtaa eedeyn taas ka yar oo waa la xukumaa. Haddii wax xal ah la gaari waayo xilligan, kiiska waa la sii wadaa ama dib baa loo dhigaa.

3. Xukun Saar

- Kiiska waxa la geyn karaa xukun saar (trial) halkaas oo uu guddiga xeer-beegtida ama xaakinku go'aamin karaan in eedeeysanuhu dembiga galay ama aanu galin ka bacdi marka ay dhageystaan dhammaan caddeymaha.
- Eedeeysanuhu wuxuu weli qiran karaa dembiga xilligan oo wuxuu iska dhaafi karaa xaqa uu u leeyahay xukun saar.
- Xilligan waxa la sii wadi karaa kiiska dhowr jeer.

4. Go'aan Xarig

- Dhibbanuhu wuxuu xaqq u leeyahay inuu wax u sheego maxkamadda xilliga dhageysiga go'aanka xaringga.
- Xaakinka ayaa go'aamiya ciqaabta uu saarayo eedeeysanaha.
- Ciqaabtaas ayaa u dhaxeyn karta sii-deyn tijaabo ah (probation) iyo/ama ganaax illaa waqt xabsi ah, taas oo ku xiran dembiga.

5. Racfaan

- Eedeeysanaha iyo looyarkiisa ayaa laga yaabaa xaalado aad u yar inay racfaan ka qaataan go'aanka xaringga ee maxkamadda. Racfaanku maaha caadi ahaan mid dhaca kiisaska dembiyada yaryar.
- Haddii uu eedeysanuhu oggolaado heshiis qirasho ah, inta badan wax racfaan ah lagama qaato.

Xusuusnow - waxaad heli doontaa caawiyaha marqaatiga dhibbanaha ah si uu adiga kaaga caawiyo baroosaska.

FIIRO GAARA: Waa bareeraha dacwad-oogaha oo qura inuu tirtiro dacwooyinka. Adigu ma tihid qofka go'aamin kara in dacwooyinka la tuuro ama la tirtiro. Fadlan u diyaargarow inaad wax sugto. Maalin kasta kiisas badan ayaa ka jira qolalka maxkamadda. Wawa laga yaabaa inaad halkan joogto saacado dhowr ah, markaas sidaas ugu diyaargarow (lagugu lama talin maayo inaad baabuurka dhigato boosteejo mitir leh, sababtoo ah waxa laga yaabaa in tigidh laguu jaro). Waa arrin fiican haddii aad soo qaadato wax aad akhrisato.

